

## Ammaan ka noqo dabka

Inaad ogaatid waxaad samayn lahayd xaaladda degdega ahi haddii dab kaco waxay isbedel ku samayn kartaa inaad noolaatid ama dhimatid.

Inaad samaysatid alaamka qiiqa iyo inaad ogaatid sidaad u baxsan lahayd haddii dab kaco waxay badbaadin kartaa nololshaada iyo tan qoyskaaga.

## Na waydiiso inaanu Eegno Siduu Gurigaagu Ammaan uga yahay Dabka

Eegitaankan Siduu Gurigaagu Ammaan uga yahay Dabku wuxuu qaadanayaa saacad nuskeed waqtigaaga. Dabdemiyaasha ayaa eegaya gurigaaga kuna siinaya talo ku saabsan sidaad gurigaaga uga dhigi lahayd mid ammaan ka ah dabka iyo inay kuu rakibaan alaamka qiiqa, oo bilaash ah, haddii loo baahdo.

Waxaa laguugu imanayaa ballan keliya iyadoo lagu qabanayo waqti kuu haboon.

Dabdemiyaasha waxay sitaan darays iyo Kaararkooda aqoonsiga.

Fadlan waydiiso inaad aragtid kaarka aqoonsiga, haddii aad rabtid inaad iska hubisidna, waxaa hore lagu siin karaa kelmad aad isku garataan.

**Soo wac khadka caawinaada ee bilaashka ah: 0800 389 5525**

**Ama iska diiwaangeli websaytka [www.wmfs.net](http://www.wmfs.net)**

Adeega turjumista waxaa la helayaa marka la soo codsado



U doono talooyinka ku saabsan ka ammaan gelida dabka:

[www.firekills.gov.uk](http://www.firekills.gov.uk)

**Akhbaartan waxaa lagu heli karaa iyadoo u qoran siyaalo kale iyo afafka kale. Fadlan wac 0845 800 9000**